

## **Oggolaansho ku saabsan bixinta macluumaadka**

Si loo awoodo in lagaa taageero oo lagaaga caawiyo jirrada aad ku qoron tahay iyo baxnaanintaba, waxaa fiicnaan lahayd inay shaqaalaha daryeelka caafimaadku ay la shaqeeyaan shaqo bixiyahaaga.

Macluumaadka khuseeya caafimaadka- iyo daryeelka jirooyinka waxaa loo ilaaliyaa si qarsodi ah. Si kastaba ha ahaatee, sirta qarsoodiga waxa meesha looga saari karaa adiga oo bixiya oggolaansho ku saabsan in macluumaadka lagama maarmaanka ah ee adiga ku khuseeya iyo xaaladdaada aad u oggolaato inay shaqaalaha daryeelka caafimaadku siiyaan shaqo bixiyahaaga.

Macluumaadka lagama maarmaanka u ah si adiga lagu siiyo taageerada ugu wanaagsan ee suurtogalka ah ee khuseysa baxnaaninta ayaa la bixinayaa oo keliya. Macluumaadka kale weli waxaa khuseeya qarsoodiga.

## **Muddo intee leeg ayuu oggolaanshuhu khuseeyaa?**

Oggolaanshuhu wuxuu shaqaynayaa laga bilaabo maalinta aad saxeexo foomka iyo wakhtiga aad ku qoran tahay jirada oo dhan, ama wakhtiga baxnaaninta iyo dadaallada la isku dubaridayaa ay soconayaan. Oggolaanshuhu wuxuu shaqaynayaa ugu badnaan hal sano laga bilaabo wakhtiga aad saxiixdo.

Waad la soo noqon kartaa oggolaanshahaaga wakhti kasta. Waxaad taas u samaynaysaa adiga oo la xidhiidha dhakhtarkaaga ama isku-duwahaaga baxnaaninta ee rugtaada caafimaadka ama qaybta isbitaalka.

## **OGGOLAANSHO**

Waxaan oggolahay in dadka ay khusayso ee jooga xarunta daryeelka ama qaybt isbitaalka aan la xiriiro aan u ogolahay inay bixiya karaan macluumaadka lagama maarmaanka ah ee aniga igu saabsan oo ay siiyaan shaqo bixiyahayga si ay u awoodaan in ay bixiyaan dadaalo firfircoon oo isku dubaridan.

Macluumaadka lagama maarmaanka ahi wuxuu noqon kartaa, tusaale ahaan, macluumaad ku saabsan caafimaadkayga iyo sida ay u saamayso awoodda shaqada. Waafajinta hawlaha shaqada iyo tallaabooyinka ku saabsan la qabsiga shaqada iyo deggaanka ayaa la caddeeyey inay ka soo gaabin karaan dadka jirooyinka ku qoran.

Macluumaadka lagama maarmaanka ah ee loo baahan yahay in la siiyo shaqo bixiyaha ayaa ah kuwan soo socoda:

.....

.....

**Waan ogahay in aan ka noqon karo oggolaanshahayga wakhti kasta oo aan rabo.**

Shaqo bixiye (magacna, lambarka telefoonka, shaqada)

.....

.....

Saxiixa	Tobanka lambar
Saxiixa	Taariikhda